



Taariikhaha dugsiyada dhexe ee xulashooyinka mudnaanta leh ayaa lasoo dadaajinayaan

Qoysaska ay ardaydooda hadda kujiraan fasalka shannad ee Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waa in ay la socdaan isbedel taariikh oo muhiim ah.

Ardaydaada haddi ay doonayaan in ay kasoo qaybgalaan dugsi leh xulashada mudnaanta inta lagu guda jiro sanadaha dugsiyada dhexe, wakhtiga la cadsado bakhtiya-nasiibka 2020-21 waa:

- **Waxay furmaysaa:** 8 subaxnimo maalinta Talaadada, Nofeembar 5
- **Waxay xirmaysaa:** 5 galabnimo maalinta Talaadada, Desembar 3

Qoysaska waxay awood u yeelaan doonaan in ay codsi ka buuxiyaan [Focus Option Transfer webpage](#). Foomka waxaa la adeegsan doonaa inta lagu guda jiro wakhtiga cadsiga.

Ardayda uqalma cuntoyinka lacag la'aan iyo kuwa qiimahooda la jabiay waxay mudnaan ka heli doonaan dugsiyada xulashooyinka mudnaanta leh. Bisha Jannaayo dhex-bartaankeeda, bakhtiya-nasiibka wuu socon doonaa qoysaskana waxay boostada ka heli doonaan waraqado.

Dhammaan ardayda PPS waxay shaki la'aan boos ku leeyihiin dugsiyada xaafadaha iyadoo lagu salaynayo xadka qaybqaadashada. Mudnaanta xulashooyinka waxay soo jiidataa dhammaan ardayda kujira PPS kuwaasoo danaynayaa habab kala duwan ee waxbarashada ama sahaminta qoto dheer ee maaddooyinka gaarka ah.

Sanadihii hore, taariikhda codsiyada bakhtiyaa-nasiibka dugsiga dhexe wuxuu socdey Febraayo ilaa Maarsa, bandhigiyadana waxaa la qabanayay Abriil. Wakhtiga waxaa loo dadajiyay si ay ula jaanqaado taariikhaha codsiyada bakhtiya-nasiibka dugsiyada sare, taasoo ka caawisaa miisaaniyada iyo shaqaaleyn, waxayna qoysaska siisa wakhti dheeraad ah ay ku qorsheeyaan natijoooyinka bakhtiya-nasiibka ka dib.

Sanad walba, boqolaal qoys ayaa cadsada ilaa 225 boos ee bakhtiya-nasiibka fasallada dhexe.

Dugsiyada leh boosas bakhtiya-nasiibka ee fasallada 6-8 waa:

- [Creative Science K-8 School](#) (qof hal-abuur leh / qaabab barashada sheekoyinka)
- [daVinci Arts Middle School](#) (ahmiyadda farshaxanka)
- [Metropolitan Learning Center K-12](#) (ahmiyad kale)
- [Odyssey Program](#) (ahmiyad taariikhda)
- [Sunnyside K-8 School](#) (ahmiyad deegaanka)
- [Winterhaven K-8 School](#) (ahmiyad xisaabta iyo sayniiska)

Macluumaad dheeraad waxaa laga heli karaa [Enrollment & Transfer webpage](#). Waxaa sido kale wici kartaa 503-916-3205, shaqaaluhuna waxay diyaar uyihii in ay kaaga caawiyaan Ingiriisi, Isbaanish iyo Rushka. Taageero waxaad ka heli kartaa Fiyatnaamiis adigoo wacayaa 503-916-3584, afka Shiinaha adigo wacayaa 503-916-3585 iyo Soomaali adigo wacayaa 503-916-3586.